

# Goorma ayay dhacayaan Kulamada FTDM?

Kulamadu waxay dhacayan wakhti kasta oo meelaynta go'aanka loo tixgaliyo cunuga/dhalinta ku lugta leh DCYF. Tan waxa kujira kahor bixitaanka guriga, joogtaynta ama badalista meelaynta marka guriga laga maqanyahay iyo dib ugusoo celinta guriga ama meelaynta joogtada ah.

Marka meelayn deg-deg ahi ka dhacdo FTDM waa in lagu qabtaa laba maalmood gudahood si loo hubiyo in qof kastaaba ogyahay oo baahiyaha caruurtana la buuxiyay.



“Kaligayo waxaan qaban karnaa wax yar; wadajir se waxaynu kuqaban karnaa waxbadan.”

- Helen Keller

Waxaan bogaadinaynaa danayntaada inaad kaqaybqaadato ogaysiiska gaaban iyo inaad wakhtigii loogu talagay ku timid kulanka.

## Kulanka Family Team Decision Making (Kooxda Qoyskaaga ee Go'aanka Gaadhaysa)

Taariikhda: \_\_\_\_\_

Wakhtiga: \_\_\_\_\_

Goobta: \_\_\_\_\_  
\_\_\_\_\_  
\_\_\_\_\_

Shaqalaha Kiiska: \_\_\_\_\_

Telefoonka: (       ) \_\_\_\_\_

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa si loo siman yahay barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed.

Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhada Qaybaha) 1-800-723-4831 ama iimayl [communications@dcyf.wa.gov](mailto:communications@dcyf.wa.gov).

DCYF PUBLICATION CWP\_0039 | DSHS 22-1170 SM (03-2020) Somali

## Kulanka Family Team Decision Making (Kooxda Qoyskaaga ee Go'aanka Gaadhaysa)



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**



## Kulanka Family Team Decision Making (Kooxda Qoyskaaga ee Go'aanka Gaadhaysa)

Kulanka Family Team Decision Making (Kooxda Qoyskaaga ee Go'aanka Gaadhaysa) (FTDM) wuxuu dhacayaa marka xaalada qoyskaaga laga yaabo inay u baahanyihiin in cunugaaga(caruurtaada) laga saaro daryeelka si loo hubiyo badqabkooda. Qoyska tabasho qaba iyo xubnaha bulshada ayaa si deg-deg ah layskugu yeedhay si lagaaga caawiyo adiga iyo shaqaalaha kiiska in samaysaan qorshe si fiican u buuxinaya baahiyaha cunugaaga(caruurtaada).

Hawl fudaydiye tababaran ayaa kulanka hagaya si uu u hubiyo in dhamaan shaqsiyaadku ay helaan fursad ay ku hadli karaan oo qorshaha la sameeyayna uu siinayo ilaalin cunugaaga(caruurtaada). Fikirka hal-abuurka leh iyo ka go'onaanshaha kuwa garanaya cunugaaga(caruurtaada) waa muhiim in ay samaynayaan go'aanka ugu wanaagsan.

### Yaa Kaqaybgalaya Kulamada FTDM?

Waalidka, xubnaha qoyska, nidaamka taageerada qoyska, DCYF shaqaalaha kiiska iyo kormeeraha, wakiilada bulshada, daryeel bixiyaasha, caruurta kawayn da'ada 12 (haday ku haboonyihiin), qaybaha kiiska, macalimiinta, bixiyaasha caafimaad iyo adeeg bixiyaasha kale waa la casuumay.

### Tilmaamaha Kulanka Waxku'oolka ah

Dhamaan kaqaybqaatayaasha si wanaagsan uga qaybqaadanaya nidaamka iyagoo maskax furan oo daacad ah, sharaxaya waxyaabaha ka go'an ee ay doonayaan, xushmaynaya siraha dadka kale, haysta fursada in la dhagaysto oo diirada saaraya badqabka baahiyaha uu u baahanyahay cunugaagu.

### Yaa Samaynaya Go'aanada?

Hadafka kulamada FTDM waa inay ahadaan kuwo furan, si daacadnimo ah loo naaqishayo badqabka cunugaaga(caruurtaada) iyo heshiis laga gaadho ugu yaraan meelayn badqabta. Haddii aanad kaqaybqaadan karin ama aan laga heshiin lama gaadhayo, DCYF waxay awood u leedahay iyo masuuliyada inay samayso go'aamo badqab oo cunugaaga(caruurtaada) khuseeya.

### Maxaa Kadhacaya FTDM?

Kulanku wuxuu qaadanayaa 1½ ilaa 2 saacadood oo waxaa hagi doona hawl fudaydiye kaasoo aqoon u leh waxyaabaha la xidhiidha caydha cunuga, adeegyada ilaalinta, shuruucda iyo siyaasadaha. Kulanku wuxuu ku taxaluqi doonaa:

- Hordhacyo iyo buuxinta tilmaamaha
- Taariikhda, tabashooyinka badqabka, awooda iyo khayraad ay soo jeediyeen qoyska, shaqaalaha DCYF iyo kaqaybqaatayaasha.
- Aqoonsiga baahiyaha cunugaaga, awoodaha qoyskaaga iyo khayraad bulshada
- Sahaminta doorashooyinka meelaynta, oo ay kujiraan qaraabada iyo dadka kale ee ku haboon, iyo sidoo kale caqabaha ku gadaaman meelaynta.
- Samaynta qorshe badqab oo deg-deg ah oo cunugaagu helo, oo ay kujiraan talaabooyinka lasocoshadu
- Qorshe qoran, sheegista waxa loo baahanyahay in la qabto, yaa qabanaya iyo goorta laqabanayo.

